Dulleynta Soomaalida iyo Digniinta Shisheeyaha:Goormay Soomaalidu ku Baraarugi Doontaa?

Qore: M. D. Afrax

Jan 21, 2012

Qormadii II (una danbaysay)

---

*"Soomaaliyeey ogow, isma leh sida aad moodi iyo waxa lagula damacsanyahay. … waxaa la rabaa gob adoo ahaan jirey oo garaad lahaan jirey in lagaa dhigo duunyo la ugaadhsado iyo midiidin lagu adeegto oo **iyagu** isa soo garba-duuba."*

(Dr. Cumar Cusmaan Raabe, *Soomaaliyeey Halkee baad ku Socotaa*?, Paris, 1989)

"Tulud geela oo dhacan baad

Toogasho u bareedhaane

Ma dhulkaan dhan oo tagey baan ninna dhagax u tuurayn!"

(Cali Mire Cawaale, 1947)

"Dadkaan la hadlayaa baan lahayn, dux iyo iimaane

Anigaa damqanayee dheguhu uma daloolaane."

(Cabdillaahi Suldaan Timacadde, 1966)

"Kama daalo qayr-sheeg dadkuna igama qaataane."

(Abshir Nuur Faarax (Bacadle, 1993)

Afeef

Aan ku bilaabo eray afeef ah. Nin saaxiiibkay ah oo akhriyey qormadii koowaad ee qoraalkan ayaa shakhsi ahaan wuxuu ii soo gaarsiiyey (Allaha ka abaal-mariyee) falcelis uu igu dhaliilayo qoraalkayga inuu ka muuqdo xanaaq ama caro badan iyo qiiro waddaniyadeed oo beri hore Soomaalidu ka wada tagtay. Waan fahmay inuu i leeyahay waxaad tahay hor-u-jeed aan waqtiga la socon ama dantiisa aqoon! Waxaan malaynayaa in badan oo idinka mid ah inaad saaxiibkay dhaliishaas la qabtaan. Anna maba dafirayo ee waan qirsanahay. Hayeeshee wax bay i xasuusisay. Dhaliishaas la

Copyright © 2011 WardheerNews.com

leeyahay maxaad *caro* u muujisay waxay i xasuusisay buug-yare *caraysan* oo aan beri dhaweyd akhriyey. Waa buug dunida gilgilay sannadkii dhammaaday (2011), raad-reebkiisiina weli meelo badan ka socdo. Magiciisu waa *Indignez-vous*! Waa af Faransiis micnihiisu af-Soomaali ku noqonayo “Ka kaca oo ka Damqada waxa Dhacaya!”. Waxaa qoray Stephane Hessel oo ah waayeel Fransiis ah, 93-jir ka mid ah dadkii u soo halgamay xoraynta Faransiiska dagaalkii labaad ee dunida, ka dibna noqday diblomaasi sare. Buug-yaraha Hessel (dhawr iyo soddon bog) wuxuu xambaarsan yahay dhambaal aad u xanaaqsan. Wuxuu ku kicinayaa dhallinyarada Faransiiska iyaguna markiiba way la boodeen kuna hawlgaleen. Waxay ku tallaabsadeen bannaanbaxyo waaweyn oo dalka wada gilgilay. Faransiiska kuma koobnaan balse caradii dhambaalka Hessel waqti yar gudihiis ayay waxay dunida ugu fidday sidii caws dab galay. Dhawr iyo tobankii bilood ee u dambeysey dalal badan oo ku yaal Yurub iyo Ameerika ayaa waxaa gilgilay dibad-baxyo caraysan oo dhallinyaradu hormuud ka ahayd. Dalalkaas waxaa ka mid ah Faransa, UK, Isbayn, Giriig iyo Maraykanka. Waxaa is qabsaday gadood aan kala go’ lahayn oo lagaga horjeedo gabood-falka maal-qabeenka iyo shirkadohooda jaheeya go’aannada dowladaha. Tusaale waxaa ah Maraykanka oo ay cirka isku shareertay xarakada la magac-baxday “*Occupay Wall Street – OWS*” (Qabsada Wall Street!”, taas oo kumaankun qof oo caraysan ay qabsadeen New York xaafaddeeda Wall Street ee ah saldhigga ugu weyn ee lacagta adduunka. Kacdoonka taariikhiga ah ee ka qarxay dunida Carabta, wajigeediina beddelay, ayaa asna qayb ka ah, weliba qaybta ugu weyn ka ah, kacdoon-weynahaas caraysan ee dadyowga dunidu ku muujiyeen inuu ka dhammaaday dulqaadkii ay ugu dhabar-adaygayeen xaaladaha jira (status quo).

Buug-yarihii la magac-baxay *Indignez-vous* (Ka Damqada!) muddo aad u gaaban ayuu wuxuu safka hore ka galay buuggaagta dunida loogu iibsiga badanyahay (best sellers). Faransiiska oo keliya ayaa bilo kooban gudohood waxaa lagu iibsadey wax ku dhow laba milyan oo nuqul. Durba waxaa lagu tarjumey in ka badan afartan luqadood, ilaa afafka Shiinaha iyo Jabbaan. Yaan loo qaadan inaan leeyahay kacdoonnadaas oo dhan buuggan ayaa ka dambeeyey. Dabcan kama wada dambeyne sababo kalay lahaayeen, qayb ayuuse ka qaatay.

Buuggan yar dhambaalkiisu in kastoo uu kululyahay haddana aad buu u kooban yahay: dhallinyarada ayuu ku leeyahay, ha iska daawanina ee ka damqada oo diida dulmiga iyo gabood-falka ay ku kacayaan waxa uu ku magacaabayo maal-qabeenka damaca waalan ee awoodda ku keliyeystey, kuwaas oo aan cidna u arxamayn, kuna tumanaya qiyamkii aadminimo ee ay seeska u dhigeen facii hore. Waxa uu ka xanaaqsan yahay

Copyright © 2011 WardheerNews.com

waa arrintaas oo ula muuqatay inay mustaqbalka halis ku tahay xasilloonida dalkiisa. Dhallinyarada ayuu wuxuu kala dagaallamayaa *is-moogeysiinta* (indifference), micnaha inuu qofku marka uu arko wax laga xumaado iska ag maro asagoo ku fekeraya “waxba kama qaban kartide danahaaga ka raaco!” Galka buugga waxaa ku sawiran oday aad u da’weyn, umal iyo ciil la qarxaya, kor u haya oo la ordaya calanka Faransiiska oo ushii ka dhacday. Dalkiisa ka sokow, Hessel asagoo Yuhuudi ah, da’daasna jooga ayuu wuxuu ka gubanayaa, oo si caro badan ay ku jirto farta ugu fiiqayaa dulmiga Dowladda Israa’iil ku hayso dadka reer Falasdiin.

Arrintan waxaa i xasuusiyey is-garab-dhig uur-gobyo leh: waxaa igu soo dhacday is-weyddiintan:, damqashada damiirka nool haddii ay fadhi iyo *aamus* u diiddey saddex-iyo-sagaashan-jir Faransiis ah, ku abtirsada quwad caalami ah oo awood badan (Yuhuud), ka dhashay dal weyn oo hore u maray, shakhsi ahaan aan wax welwel ah ka qabin inta yar ee noloshiisa ka hadhay, waxa keliya ee uu u baahan yahay ay ahayd inuu iska nasto; ninka da’daas jooga, duruuftaasna ku sugan haddii uu damiirkiisu ku dhaqaajiyey inuu “damqado”, inuu ka dhiidhiyo wax asaga *dulmi* ugu muuqday, inuu caro la qarxo, furka tuuro, dadkiisa kiciyo, da’yarta u qayla-dhaamiyo, dhawaaq dheer ku yiraahdo “*Indignez-vous* – Ka kaca oo ka Damqada waxa Dhacaya!”;

Ninka caynkaas ah – *waxa* uu ka gilgishayna ay noqonayaan *wax yar* marka la garab dhigo *waxa* annaga na haysta – haddii laga garaystay inuu caro la qarxo, haddii dadkii uu la hadlayey ay dhambaalkiisii dhabarka u riteen, dhakhso ugu hawl-galeen, la dhiidhiyeen, ku dhiirrigaliyeen, ku abaal-mariyeen magac caan-baxay iyo maal uusan fileyn; halka ilaa xadkaas laga garaabay caradii ninka tilmaantaas leh, tolow xaq ma tahay in la garaysan waayo ama lalaba yaabo carada yar ee laga dhadhansaday qoraalkayga, anigoo ah Soomaali maanta jooga? Gar ma tahay in la igula yaabo maxaad uga xanuunsatay gurracnaanta iyo gabood-falka sababay burburka iyo halaagga godka dheer ku ridey dalkii aad u dhatay iyo dadkii aad ka dhalatay? Hadduu Hessel ka *aamusi* kari waayey xaq-soorla’aanta inta awoodda lihi kula dhaqmayaan dadka intiisa kale, sidee Soomaali damiir damqada leh looga fili karaa inuu *ka aamuso* damiirlaaweyaal Soomaaliyeed iyo dulmi-ku-nool shisheeye oo isu kaashaday xuma-fal geeri iyo gunimo dhaxalsiiyey ummad ahaan jirtey qaran dowlad ah oo dunida sharaf ku leh! Soomaali iska daaye sidee bini-aadmi damiir leh uga damqan waayaa ummad dhan oo dil lagu xukumay, qori la isugu dhiibay, waagii beryaba kumaan-kun xabbad iyo silic u dhimanayaan, dhallaankeedii mustaqbal-la’aan la dhigay, magaceedii la dilay, dhulkeedii la kala googoostay, khayraadkii ku jirey la xaalufiyey, bad iyo birriba si arxandarro ah loo bililiqaystay, wixii harsan la sumeeyey, iimaanlaawihii fursad helaa ka

Copyright © 2011 WardheerNews.com

iibinayo cadow soo qamaamay, intii kale iska daawanayso, iska qoslayso, TIIH iyo walaahow ku maqantahay, kii hadla afka la goosanayo, hadduu yiraahdo “naf-difaacu waa xaq” lagu qoslayo. la oranayo dan kaluu ka leeyahay! Waa nasiibdarro aan dunida meel kale ka dhicin!

Haddaba, waa afeeftiiye, waxaan ku afeefanayaa, yaan qalad la iga fahmin. Yaan loo qaadan ujeeddada qoraalkani inay tahay kicin, sida buugga odayga Faransiiska ah. Asagu wax buu isku hallaynayey. Wuxuu sii garanayey inay dadkiisu si fudud ula fahmi doonaan waxa uu ka hadlayo. Qoraalkan yar ee aan halka ku xar-xarriqayo ujeeddadiisu ma aha *Kicin* balse waa *ku-baraarujin*. Waa *xog-tabin* iyo *xanuun-cabbir* aan u arko xaq iyo waajib, *xaq* aan u leeyahay naf-difaaca ummaddayda iyo *waajib-gudasho* aan ku yar-qaboojinayo dareenkayga holcaya iyo damiirkayga i hawlaya. Ujeeddada saddexaad waa *u-hiillin xaqiiqda dadka laga indha-saabayo*. Mid afraad, oo taa saddexaad ku lammaan, waa ka-*run-sheegga taariikhda* ay berri akhrin doonaan *da’da soo koraysa*. Da’daas oo u baahan, xaqna u leh inay *fahmaan* xaqiiqda *wixii* ku dhacay dalkii ay u dhasheen iyo dadkii ay ka dhasheen, in lagu caawiyo inay helaan *xaqiiq* ay ka *tilmaan-qaataan*; xaqiiq ka badbaadisa taariikh la *been-abuuray* oo ka sii lumisa tubtii ay ku badbaadi lahaayeen.

Abwaannada aan erayadooda kor ku xusay ayaan waxaan la wadaagaa dareenkaas ay waqti dheer ka hor kaga cabanayeen adduun-aragga dadkeenna oo weliba waayadaas si weyn uga sarreeyey halka uu maanta yaal. Waa dareen ku dabraya. Waxaa dabraya tuhun aan malaynayo dadka Soomaaliyeed ee akhrin doona ama ka war heli doona qoraalkan in ayan tiro ahaan badnaan doonin tayo ahaanna badantahay inta maskaxda laga haysto. Dhinac waxaa ka haysta marin-habaabinta lagu hoosaasinayey muddo ka badan 20 sano. Dhanka kalena waxay u af-duuban yihiin adduun-arag ay hagayso caaddifad qabyaaladeed oo dabool weyn saartay diiraddi caqliga iyo dareenkii waddaninimo. Halka dadka kale akhriyaan, qiimeeyaanna xogta iyo fikradaha, annaga Soomaalida ah waxaan akhrinaa oo keliya qofka qoray waa qolamma? Nasiib-darro, Soomaaliyi maanta waxay maraysaa heer faragalinta ajnabiga iyo duullaanka ciidammada shisheeye loogu kala qaybsamo dareen qabyaaladeed, qolo soo dhaweysa iyo qolo ka qaylisa oo labadaba waxa hoggaaminayaa ayan ahayn shucuur waddaniyadeed balse ay tahay xintan qabyaaladeed! Marka loo gashado muraayadda noocaas ah maqaalkan iyo qorihiisu waxay noqon doonaan “hal laba-midigle dheelmay dhanna uma fayooba”. Balse aan rajeeyo inuu noqdo mid dood fura, dood ka soo maaxatey maskax fayow iyo indho furan, indho u fiirsaday wixii hareereheenna ka

Copyright © 2011 WardheerNews.com

dhacayey labaatankan sano, dood diiradda saaraysa sama-talis iyo xal-doon. Waan ogahay inaan qaldami karo waana soo dhaweynayaa wixii sixitaan iyo toosin ah.

Qayla-dhaan

Qormadii 1[aa] ee qoraalkan waxay xambaarsanayd xog-warran bixinaya digniin culus. Xog-warran dadka Soomaaliyeed ku baraarujinaya inuu farahooda ka sii baxayo dhulkii ay lahaan jireen. In laga gaarey go'aan ah "tashan mayside waa laguu talin!". Talada laguu hayaana waa **xukun dil ah** oo laguu qariyey. Dil lagu xukumay qaranimadii Soomaaliya iyo gobanimadii Soomaalida! Waa xukun si qarsoodi ah loo gaarey in khariidadda ama maabka quruumaha laga saaro dalkii loo yiqiin Soomaaliya. Dadka "Soomaali" loo yaqaanna cawaaqibkoodu ku dambeeyo tilmaantii uu rubuc-qarni ka hor sii oddorosay filosoofka reer Jibuuti Dr. Cumar Cusmaan Raabe, tilmaantaas oo ahayd "midiidin lagu adeegto oo iyagu isa soo garba-duuba" (kor ka eeg).

Digniintaasi ma ahayn belo-sheeg aan anigu iska male-awaalay. Waxay ahyd xaqiiq ka dhex bidhaantay xog fara badan oo aan soo ururiyey, ka dibna soo bandhigay. Qormadaas koowaad waxaan ku soo bandhigay qoraallo xog-ogaal ajnabi ah iyo caddayno muujinaya inuu jiro go'aan sir ah oo ay mar hore meel dhigteen quwado shisheeye oo ay ka mid yihiin kuwa ay maanta gacanta ugu jirto taladii Soomaaliya ee mar hore ka baxday gacanta Soomaalida.

Xogtaas iyo qoraalladaas ay ku caddahay qorshahani inuu yahay mid dhab ah oo jira, waxaan tusaale uga soo qaadannay dhawr lagu faafiyey saxaafadda Keenya ayna qoreen aqoonyahanno iyo xog-ogaal isugu jira Maraykan iyo Keenyan. Waxaan soo xiganey qoraalkii ay jariidadda afka dheer, The East African (30 October 2011) ku magacawday "Grand Strategy", qorshe-weynaha ay Soomaaliya ku qaybsanayaan dalalka la dariska ah oo ah Keenya iyo Itoobiya (eeg qormo 1). Waxaan kaloo qormadii koowaad ku soo bandhignay faahfaahin qayaxan oo ay isla qorshahaan hore uga bixisay jariidad-qarameedda Keenya, Daily Nation (4 October 2008). Waxaan tilmaannay maqaalkii qareenka reer Keenya Donald Kipkorir uu ku tiiq-tiiqsanayey sida ay muhiim u tahay una fududdahay inay Keenya iyo Itoobiya kala googooyaan ka dibna kala qaybsadaan dhulka Soomaaliya, marka ay gacanta ku dhigaanna iyaga iyo quwadaha waaweyn ee la saaxiibka ah inay iska kaashadaan la-soo-bixidda iyo ka-faa'ideysiga khayraadka dabiiciga ah ee uu hodonka ku yahay dhulka Soomaaliyeed. Quwadaha uu tilmaamay, sheegayna inay arrintan gacan ku siinayaan waxaa hormuud ka ah Maraykanka.

Copyright © 2011 WardheerNews.com

Qoraal kale oo aan tix-raacnay wuxuu ahaa kii qorshe-weynahan iyo cawaaqibka ka dhalan doona uu ku falanqaynayey Prof. Michael Weinstein (Kenya News 24, 14/11/11) oo ah hormuudka khubarada Maraykanka ee darsa siyaasadda Soomaaliya, ahna barfasoor culuunta siyaasada ka dhiga Jaamacadda Purdue ee Maraaykanka. Warbixintaas Dr. Weinsten wuxuu hawlgalka militari ee Keenya ku gashay Soomaaliya (Itoobiyana ka daba gashay) ku tilmaamay inuu yahay bilowgii fulinta qorshahaas lagu qaybsanayo dhulka Soomaaliya, laguna soo af-jarayo qaranimadii Soomaalida. Wuxuu ka digay inaan dib dambe loo arki doonin Soomaali uu u dhisanyahay qaran doowlad ah. Wuxuu tilmaamay dadka Soomaaliyeed qorshahani inuu ka dhigi doono maxaysato aan lahayn dhisme siyaasadeed iyo jiritaan wadareed, loona oggolaan doonin inay cod ku yeeshaan ka talinta aayohooda dambe. Tani waxay waafaqsantahay oddorostii Dr. Raabe ee aan kor ku tix-raacnay.

Isla maalmahaas, jiritaanka qorshahan waxaa asna ka marag furay khabiir kale oo ruug-caddaa ah oo Maraykan ah, safka horena kaga jira maskax-maalka looga tala-qaato siyaasadda Maraykanka ee ku wajahan Geeska Afrika. Waa Prof. Robert I. Rotberg, oo barfasoor ku ah culuunta dowladnimada iyo arrimaha dibadda. Prof. Rotberg wuu ku farfiiqayaa jiritaanka qorshahan wuxuuse asagu ka door bidayaa, qoraalkiisana diiradda ku saarayaa hindise uu soo jeedinayo in xukunka Soomaaliya si toos ah loogu wareejiyo Midowga Afrika (AU trustship) ugu yaraan muddo 10 sano ah. Wuxuu raacinayaa 'inta ay Soomaalidu ka baranayaan inay iyagu is maamulaan' (qosol-gariir)! Hindisahan, oo uu Prof. Rotberg (Thinkafricapress, 1/12/2011) ku tilmaamay "waddada keliya ee furan", waa la garan karaa in aanu ahayn mid asaga ku kooban, marka la isu geegeeyo hadallo kale iyo arrimo badan oo soo baxbaxaya. Hubaal waxaa la oran karaa heshiiskii Kampala ee Juun 2011, wuxuu gogol-xaadh u ahaa hindisaha noocaan ah. Muddada dhow waa hindise fulintiisu ka fududdahay, una sii gogol-xaadhaya qorshe-weynihii aan soo tilmaannay, kaas oo ayan weli wax kastaa u bislayn in si rasmi ah loogu dhawaaqo, wallow ay muuqato inuu yahay yoolka loo sii socdo. Bilihii la soo dhaafay waxaa la qaaday dhawr tallaabo oo ay iska caddahay in loogu gogol-xaadhayey qorshahan isaga ah. Waa tallaabooyin is wada buuxinaya ahna kuwo talada Soomaaliya si tallaabo-tallaabo ah looga wareejinayo gacanta Soomaalida. Waxaa ka mid ah Heshiiskii Kampala, dhiirrigalintii magaca midowga Afrika lagu ansixiyey inay Kenya iyo Itoobiya qabsadaan dhulka Soomaaliya, iyo dajinta iyo hoggaaminta geeddi-socodka loo bixiyey 'Road Map', kaas oo hoggaaminta arrimaha Soomaaliya awooddeeda si cad loogu wareejiyey hay'adda UNPOS oo ay wakiisheen

Copyright © 2011 WardheerNews.com

quwadaha dhaqaalaha bixiya. Markii loo baahdana waxaa la isticmaalaa shaabbadda Midowga Afrika iyo IGAD.

Haddaba annagoo halkaas ka sii amba-qaadayna, qormadan labaad waxaan ku falanqayn doonnaa jawaabaha qaar ka mid ah su'aalihii aan isku weyddiiney qormadii koowaad. Waxaan ku bilaabi doonnaa su'aalaha soo socda.

Yaa u Sabab ah Dowlad-burburka iyo Dagidla'aanta Soomaaliya?

Yaa ka dambeeyey burburintii dowladnimadii Soomaalida? Yaa hortaagan in dib loo soo celiyo? Yaa hoosta ka hurinaya dagaalka sokeeye ee aan dhammaadka lahayn sababtiisana la garanayn? Muxuu u dagi la'yahay dalkani halka ay quwadaha reer Galbeedku wada dajiyeen, dibna u dhiseen dalalka kale ee ku burburay dagaal sokeeye oo ka qota dheer kan Soomaalida? Yaa fashiliya heshiis kastoo la gaaro iyo dowladdii dib loo yagleelaba?

Arrimahaas isku wada xiran, ma waxaa ka masuul ah annaga Soomaalida ah? Ma waxaa hoos ahaan uga shaqaynaya shisheeye naga awood badan oo dantooda ka dhex arkay daagaalka iyo dowladla'aanta? Mise waa labadaba?

Jawaabta runta ah waxaa muuqata inay tahay *labadaba*. Sida ay labadaba u tahay iyo labada dhinac midba qaybta uu ka qaatay hoos ayaan ku faahfaahin doonnaa.

'Laxiba shillalkay is dhigtaa lagu qalaa'

Waxaa jira muran soo noqnoqda. Dad badan oo Somaali ah ayaa marka ay cidi soo hadal-qaaddo inay jirto gacan shisheeye oo hagardaamo wadda ama cadow dibadeed oo si dadban uga shaqaynaya dhibaatada Soomaalida, waxay la soo boodaan 'Waar Soomaalidu iyadaan dad ahayn ee ma jirto sabab ay cid kale ku bar-tilmaameedsato!". "Beesha caalamku aad ayay noogu dadaashay ee annagaa wax qabsan kari weyney". "Eedda annagaa leh ee waxba yaynaan cid kale eedayn". Ma dhab baa taasi? Maya iyo haa. Waa run inaan annaga Soomaalida ahi leenahay '**eed**' weyn. Waa run in *waxa* sida tooska ah u burburiyey dowladnimadii ay yihiin keli-talis, musuqmaasuq, caddaalad-darro, waddaniyadla'aan, sakhrad qabyaaladeed iyo kursi-doon indhala' oo intaba ay ku kacayeen dad Soomaali ah, Soomaali oo dhan ma ahee mas'uuliintii siyaasadda. Intaa oo dhan ciddii tilmaantaa been ma sheegin, waana cudurro haddaannaan iska daweyn aannaan dowladnimo hanan karayn. Waxayse dadka badankoodu ka indha la'yihiin laba xaqiiqo oo tan garab-yaal: Xaqiiqda koowaad waxay tahay, cudurradaas dhammaantood ma aha wax Soomaalida u gaar ah. Waa cudurro

Copyright © 2011 WardheerNews.com

ama cillado ay nala wadaagaan dhammaan dalalka Afrika, dunida Carabta iyo guud ahaanba dunida saddexaad inteeda badan. Dalalkaas oo dhan iyagoo nala wadaaga cudurradaas ayay haddana ka badbaadeen burburka aan ka kici kari la'nahay. Waa maxay sababtu?

Xaqiiqda labaad, ahna sababta aan u badbaadi weyney: xuma-falkii ay ku kacayeen siyaasiyiin Soomaali ah oo uummaddan hor boodayey dhawr iyo soddonkii sano ee la soo dhaafay, welina ay jiraan qaar halkii ka sii wada, ma ahayn wax aan dhaafsiisnayn Soomaalida, balse waxaa ku dhex jirtey oo kaalin weyn ka ciyaaraysey gacan shisheeye (dib baan ka faahfaahin doonnaa). Xuma-falayaasha madax-ku-sheegga ah waxay goor walba ku xiran yihiin shar-wadeen ajnabi ah, si uuna fahmi karin qofka caadiga ah. Taas ayaa ah sababta ugu weyn ee cudurradaasi *annaga* Soomaalida ah noo dileen dalalkii nala qabeyna u dili waayeen. Dalalkaa kale qudhoodu kama badbaadsana faragalin dibadeed, waxaase kala duwan nooca faragalinta, taas oo ku xiran nooca danaha laga leeyahay dal kasta oo ka duwan dalka kale.

A) Cilladaha Soomaalida ee Burburka Fududeeyey

Marka la qodobbeeyo, cudurada iyo cilladaha kor ku xusan waxaa ugu waaweyn kuwa hoos ku taxan:

1) **Qabyaalad**;
2) **Hoggaan-xumo;**
3) **Caddaalad-darro iyo musuqmaasuq ay caadeysteen siyaasiyiin aan damiir lahayn.**

Waa saddexda aafo ee qaranimada curyaamiyey, dibindaabyada cadowgana albaabka u ballaqay;

4) **Caaddifad indha la'** oo caqliga hawl-gab ka dhigta;
5) Saddexdaa kore oo dilay dareenkii *qiirada waddaninimo*;
6) **Jahli iyo fiira-gaabni** ay ugu darantahay tan garwadeenka siyaasadda;
7) **Maalin-la-noolnimo** – micnaha ku xisaabtanla'aan shalay iyo berri - shalay wixii la soo maray oo aan laga tilmaan-qaadan iyo berri waxa dhici kara oo aan laga gaashaaman ama lagu baraarugsanaan;
8) **Xintan** iyo **xased** (heer qof iyo heer qabiilba) ;

Copyright © 2011 WardheerNews.com

9) **kala dambayn la'aan**, taas oo iyada iyo xintanku burburiyaan isku-duubnida ummad ahaaneed, maja-xaabiyaanna hoggaanka wanaagsan iyo halyeygii soo bixi lahaa;
10) **Xusuus la'aan** – "illowsho dhawinaa innagu Soomaaliyeey!" (abwaan Cabdi Muxumud Amiin).
11) **U-fiirsila'aan** iyo **ka-fiirsi la'aan** – wax kastaa orod bay nugu dhaafaan indhala'aanna waan ugu boodnaa. Maskax waan leenahay kamase shaqaysiino
12) **Garan-waa** ama **dhegweynimo/dhukanaan** ay u sabab tahay u-fiirsila'aantu;

Ummad caqligeedii safar dheer ku maqanyahay!

Tusaale marag u ah labada qodob ee kore (10 & 11), waxaa ilaa maanta la la'yahay wax Soomaali ah oo u fiirsada, dersa, ka dibna fahma riwaayadda ay labaatanka sano nugu hoosaasinayeen waxa loo yaqaan beesha caalamku "international community". Waa wax la-yaab leh inay muddo ka badan 20 sano Soomaalidu garan kari la'dahay in laga riwaayadaysanayo laguna dul shaxayo, lagu dul taajirayo, laga leeyahay qorshe kale, qorshe liddi ku ah waxa la maqashiinayo. Waxaan faham iyo u-fiirsi u yeelan kari la'nahay in xoogaggan shisheeye (ee ah cidda dhabta ah ee gacanta ku haysa go'aanka siyaasaddeed ee Soomaaliya), haddii ay run ka tahay ama daacad ka yihiin waxa ay ku hadlaan oo ah inay Soomaalida ku caawinayaan inay nabad iyo dowladnimo ku soo noqoto, in hadday taasi run ka tahay waddankan mar hore la dajin kari lahaa sidii loo dajiyey dalalkii naga darraa ee isla xoogaggani ku dajiyeen muddo aad u gaaban. Waxaan wada ogsoonnahay madaxda Soomaalidu inay degdeg u fuliyaan amarrada kaga yimaada beesha caalamka (UN, AU, IGAD, US, iwm) sida marka ay shir ugu yeeraan ama ku amraan inay iska xaadiriyaan waddan dibadda ah. Waxaan kaloo ognahay go'aannada muhiimka ah ee ka soo baxa shirarka Soomaalida inay yihiin wixii ay yeeriyeen xoogaggaas dibaddu. Xad waxay gaarsiisan yihiin madaxda ugu sarraysa ee DKMG ah kii ay doonaan ay ku amraan inuu xilka ka dego, asna uu ku khasbanaado inuu u hoggaansamo (Farmaajo iyo dowladdiisii, Cabdullaahi Yuusuf, Adan Madoobe). Haddaba, sida amarradoodaas oo dhan ay Soomaalidu u fuliso ayaa loo fulin lahaa wax kastoo tallaabooyin ah ee ay amraan in dalka lagu dajiyo, dagaalka lagu joojiyo, dowlad awood leh lagu dhiso. Waqti kuma qaadateen balse xaqiiqda ayaa waxay tahay in *ayan doonayn inuu dalkani dego oo ku soo noqdo nabad iyo dowladnimo*. UNPOS iyo cidda shaqadaan u soo wakiilatay, oo ah Maraykanka iyo xulufadiisa, si kutalagal ah ayay u marin-habaabinayaan geeddi-socodka siyaasaddeed ee dadka la maqashiinayo in Soomaaliya lagu dajinayo. Prof. Michael Weinstein, oo ah khabiir Maraykan ah si cad ayuu u qeexay quwadahan iyaga ah iyo hay'adda ay

Copyright © 2011 WardheerNews.com

Soomaaliya u dhiibeen (UNPOS) in ayan marnaba ku talagalin inay Soomaaliya ku soo celiyaan dowladnimo dhab ah. Wuxuu qeexay, cid kastaana fahmi kartaa in waxa ay ku tala galeen ay tahay oo keliya dowlad-ku-sheeg aan meelna gaarayn oo ujeeddada ay ka leeyihiin ay tahay uun in maga Soomaalida looga saxiixdo wixii la doono; waxaas oo keliya u adeegaya danaha quwadahaas shisheeye iyo inta la hal-maasha, lidna ku ah danaha iyo jiritaanka Soomaalida (eeg warbixinta Prof. Weinstein, *Somalia: the Posibility of Balkanization*, 21 July 2011).

Cilladaha kor ku taxan waa ayaandarro na haysata haddaan Soomaali nahay. Waa caqabado curyaamiya dadaalka qaran-dhiska. Ha yeeshee waa qalad in waxa keliyee naga hor-muuqdaa ay noqdaan ceebaha iyo cilladaha aan leenahay. Xilliyada burburka iyo dhibaatada waxaa bata is haaraanka, is-eedaynta iyo is liididda. Marka ay is-biirsadaan taas iyo magac-dilka cadowgaagu si dadban kaaga dhaadhiciyo waxay dishaa ku-kalsoonida naftaada iyo kartida wax-qabsigaaga. Waxay kuu hoggaamisaa is-karhid, is-dhiibid iyo quus loo dhinto. Sida ummadaha kale, Soomaalidu waxay leedahay sifooyin aad u wanaagsan oo ka badan kuwaas aan wanaagsanayn ee aan soo tilmaanay. Dunida ma jirto ummad aan cillado lahayn. Qaar naga cillado badan ayaa ka nabad qaba ama ka sara kacay burbur iyo colaad sokeeye. Sababta Soomaalidu u badbaadi weydey ayaa haddaba tan ah: Ducfigeedu waa halkiisee, waxaa u soo tafa xaytey cadow caynado badan, oo shaarar kala duwan ugu soo hoos gabbaday, oo ka faa'ideystey cilladahaas iyaga ah. Sidii aan hore u tibaaxay, ducfigaas ayaa loo adeegsadey si aad u farsamaysan (highly systematic), oo ay Soomaalidu weli fahmi kari la'dahay.

B) Ma jiraa Shirqool Shisheeye?

Dadka Soomaaliyeed kama duwana dadyowga dunida, samaan iyo xumaanba, weliba waxaa jira wax badan oo lagu ammaani karo ama laguba ammaano laguna cawryo, sida firfircoonida, isku kalsoonida iyo inay yihiin ummad ku midaysan wax badan oo asaasi ah (dal, diin, dir, dhaqan, af iwm). Waxa dunida ka faquuqay, dowladnimo u diiday, dalalkii la badbaadiyey ka reebay inuu kow ka yahay shirqool shisheeye wax badan oo caddaynaya ayaa jira. Waxaa shakiga ka saaraya xogtii badnayd ee aan ku soo bandhignay qormadii koowaad iyo qaar kale oo aan imminka raacin doonno. Mas'uuliin caalami ah iyo xeel-dheerayaal xog-ogaal ah ayaa marar kala duwan si cad u sheegay inay gacan ajnabi ka dambayso burburka iyo degidla'aanta Soomaaliya. Madaxdaas caalamiga ah waxaa ka mid ah Xoghayaha Guud ee Qarammada Midoobey, Madaxweynihii hore ee Kenya iyo

Copyright © 2011 WardheerNews.com

hoggaamiyihii hore ee urur-weynaha Caalamiga ah, Refugee International. Xeeldheerayaashana qaar badan horaan u soo sheegay, qaar kalena way soo socdaan.

Xoghayaha Guud ee Qammada Midoobey Ban Ki-Moon khudbaddii muhiimka ahayd ee uu ka jeediyey Kulan-weynihii Caalamiga ahaa ee Istanbul, 22/5/2010 ee ku saabsanaa Soomaaliya wuxuu caddeeyey nabadaynta iyo dajinta Soomaaliya inay hortaagan yihiin dhinacyo ka leh dano dhaqaale. Madaxweynihii hore ee Kenya, Danial Arap Moi, wuxuu asna hore u sheegay dowladnimada Soomaaliya inay caqabad ku yihiin dhinacyo kale dano siyaasadeed. Dhinacyadaasi kuwa ay yihiinna af cad ayuu ku sheegay ee, sida Ban Ki-moon, kama uu gaabsan magacaabistooda. Wuxuu caddeeyey inay arrintan hortaagan yihiin Keenya iyo Itoobiya, oo ka cabsi-qaba hadday Soomaaliya dib uga dhisanto dowlad midnimo qaran oo nabad iyo barwaaqo keenta inay soo noolayn karto sheegashadii dhul Kenya iyo Itoobiya ka mid ah. Sidaa wuxuu ku caddeeyey khudbad uu September 2003[dii] ka jeediyey Jaamacadda Gaashaandhigga Maraykanka, Washington (eeg Daily Nation, 19 September 19, 2003).

Waa kuwee dhinacyada kale ee ku lug leh shirqoolkan qaran-tirka Soomaalida?

Mar kale jawaabta waxaan u deynayaa xog-ogaal ajnabi ah.

Guddoomiyihii hore ee hay'adda caalamiga ah, Refugee International, Kennith Bacon, oo soo koobayey warbixin hay'addiisu ka diyaarisay xaaladda Soomaaliya, wuxuu sheegay dhibaatada Soomaaliya inuu ka mas'uulyahay Maraykanku. Sidaa awgeed wuxuu ka codsaday Maraykanka inay beddelaan waxa ay Soomaaliya uga talagaleen. Hadalkiisii oo kooban waxaa laga sii daayey, ee qofkii u baahan ka dhageysan karaa idaacadda BBC World Service, Laanta Af-Soomaaliga, 19/11/2008.

Talyaaniga, asaguna lugta weyn ee uu ku leeyahay burburinta Soomaaliya xeeldheerayaal kala duwan ayaa hore farta ugu fiiqay. Tusaale waxaan u soo qaadanaynaa khabiirka lagu magacaabo Wolfgang Achtner oo qoray diraasad halkudheggeedu yahay ' *The Italian Connection: How Rome Helped Ruin Somalia'* oo af-Somaali ku noqonaya 'Ku lug lahaanta Talyaaniga: Sidii Roma gacan uga geysatey burburinta Soomaaliya' (Washington Post, 24/1/1993).

Copyright © 2011 WardheerNews.com

Dhinacyada kale ee qaybta libaax ka qaatay burburinta Soomaaliya, welina si dadban u hortaagan nabadda iyo xasilinta dalkan waxaa safka hore kaga jira waxa loo yaqaan hay'adaha caalamiga ah ee samafalka (international aid agencies), oo si dahsoon qayb uga ah, dhibaatada Soomaalidana ka dul-taajirey, wallow ay jiraan qaar bixiya gargaar loo baahanyahay, qaddar kasta ha ahaadee. Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa "qaylo yeedhaaba qolay dan u tahay". Sida ay qoladani uga qayb-qaadatay, ugana faa'ideysatey burburka iyo dagaalka Soomaalida faahfaahinteeda waxaan iyana u deynayaa xog-ogaal kale oo reer galbeed ah. Waa Suxufiga caanka noqday, Michael Maren, ahna qoraaga buugga caanka ah, ***Road to Hell*** (Waddada Naarta) buuggaas oo uu daboolka uga qaadayo dibindaabyada dahsoon iyo xuma-falka ay ku dhaqmaan hay'adaha "sama-falku". Wuxuu ka mid ahaa dhallinyaro muddo badan u shaqaynaysey hay'adaha "sama-falka" caalamiga ah ee Soomaaliya ka hawlgala. Diraasad dheer oo uu cinwaan uga '*How the Culture of Aid Gave us the Tragedy of Somalia'* (The Village Voice, 19/1/1993), Michael Maren wuxuu qeexayaa *waxa* Soomaaliya burburiyey in ay ahaayeen gacan ajnabi oo adeegsanaysey siyaasiyiin Soomaaliyeed oo ay xaaraan ku heshiiyeen. Wuxuu qeexayaa qaybtii libaax ee "hay'adaha samafalku" burburintaas ka qaateen.

Halkan laguma soo koobi karo xog-ogaalka aan Soomaalida ahayn ee marar badan daaha ka rogey shirqoolka Soomaalida loo maleegayo, iyaguna ka indha la'yihiin. Keliya waxaan idiin raacinayaa xog-ogaal Carbeed oo si damqasho ku jirto farta ugu fiiqaya dhinacyada aad u kala duwan haddana ka midaysan joogtaynta dagaalka iyo dowladla'aanta Soomaaliya, taas oo uu midkood waliba dantiisa ka dhex arkay. Waa khabiir Masar u dhashay Ingiriiskana deggen oo ku takhasusay arrimaha Geeska Afrika. Magiciisu waa Axmed Shaakir. Telefishinka afka dheer, Almustaqillah, ayaa ku marti-qaaday barnaamij toddobaadle ah oo lagu magacaabo XALAQAT ANIQAASH. Mowduuca toddobaadkaas wuxuu ahaa '*Eedda Carabtu ku leedahay waxa Soomaalida ku Dhacaya'*. (Almustaqillah, September 2009).

Xeeldheere Axmed Shaakir, oo cuskanaya xog badan oo uu ururiyey, wuxuu tilmaamay inay jiraan dhinacyo badan oo siyaalo kala duwan ugu lug leh xasilidla'aanta Soomaaliya, sababta kore awgeed. Wuxuu la-yaab ku tilmaamay inay arrintaas ka midaysan yihiin dhinacyo sidooda kale cadow isu ah, sida reer galbeedka iyo argagixisada caalamiga ah; Carab iyo Yuhuud, kwd. Axmed Shaakir, intuu damqaday ayuu kor ugu dhawaaqay oraah wax weyn xambaarsan. Wuxuu yiri. "KULLUL ADRAAS TANHASH FI ALLAXAM ASOOMAALI!" (Cid waliba waxay u haliilaysaa inay micida darto hilibka Soomaalida).

Copyright © 2011 WardheerNews.com

Halkan waxaa xusid mudan, dhinacyada kala duwan ee ay muuqato inay sannadahan dambe ku lug lahaayeen fashilinta geeddi-socodka nabadaynta iyo soo celinta dowladnimadii Soomaaliya, laguma doodi karo inay ku wada lug lahaayeen burburintii hore ee dowladnimadii dalkan. Waxaa la qiyaasi qaraa qaar badan oo ka mid ah inay marar dhexe arrintan ku soo lug yeesheen, ka dib markay fursad dan u ah ka dhex arkeen dal ayan ka jirin dowlad ilaalisa, ayna ka oogan yihiin dagaal iyo fawdo wax kasta lagu dhex qarin karo. Fursadahani way kala duwan yihiin. Tusaale ahaan, argagixsada caalamiga ah waxay fursad u arkeen waddan aan dowlad lahayn oo ay xornimo buuxda iyo baqdinla'aan ku gali karaan, saldhigna uga dhigan karaan; dillaaliinta caalamiga ah ee hubka waxay fursad u arkeen dal dagaal ka ooganyahay oo ay hubka u iib-geeyaan; ma aha wax qarsoodi qaybta libaax ee ay qolyahaasi ka qaataan hurinta iyo joogtaynta dagaallad colaadaha, dunida oo dhan; dowladihii Soomaaliya u ciil-qabey amase colaaddu ka dhexayn jirtey waxay u arki karaan fursad ay yiraahdaan "gaalaa god iigu jiree garruunka ii keen!" sida Soomaalidu ku hal-qabsato; iwm.

Waxaa jirta maahmaah Carbeed oo tiraahda, 'Marka biciidku jabo middiyuhu way bataan'. Habar waliba middi bay la soo oroddaa si ay cadkeeda u goosato! Dadkaas raqda ku soo qamaamay ee hilibku u hillaacay haddii lagu yiraahdo "neefka la qalan mayee waa la kabayaa ee nala qaada" lagama fili karo inay dar Ilaahay u oggolaadaan. Waxay u badantahay inay hoos ahaan u sii jajabiyaan addimmadii fayoobaa! Waa sawirkaas waxa Soomaliya maanta yaal.

Maxaa Sababay Shirqoolka Shisheeye?

In badan oo ka mid ah jawaabta su'aashan kore waxaa hore noogu qeexay xog-ogaalkii badnaa ee aan soo xiganney. Waxaa ka mid ahaa Ban Ki-Moon (dano dhaqaale), Arap Moi (dano siyaasadeed), Dr. Michael Weinstein (dano istratijiyadeed iyo qaar dhaqaale) iwm. Qayb kale oo jawaabta ka mid ah waxay iyana ka dhex muuqataa qoddobka kore. Guud ahaan sababaha waxaa look ala saari karaa laba qaybood: qaar Soomaalida ku gaar ah iyo qaar lala wadaago oo qayb ka ah waayaha dunida ee maanta socda.

Xagga danaha dhaqaale, waa tii ay qeexeen Donald Kipkorir iyo Michael Weinstein in si looga faa'ideysto khayraadka dabiiciga ah ee dhulka Soomaaliyeed ay tahay in talada dalkan laga wareejiyo gacanta Soomaalida, maxaa yeelay Soomaldu xilliyadii ay awoodda lahaayeen waxaa lagu bartay inay yihiin qolo madax adag, isla weyn,

Copyright © 2011 WardheerNews.com

ajnabigana fogeysa. Waxaa la qiyaasi karaa arrintan inay lug weyn ku leeyihiin shirkadaha waaweyn ee batroolka, kuwa hubka, macaadinta, kalluumaysiga iyo aasidda sunta warshadaha, iyadoo sida la ogyahay shirkadaha reer galbeedku, siiba kuwa waaweyn ee Maraykanku, ay yihiin quwadda ka dambaysa go'aannada dowladda, siiba go'aanada khuseeya arrimaha dibadda.

Marka la soo koobo, sababaha Soomaaliya mowqifkan laga qaato waxaa loo qodobbayn karaa sida soo socota:

A) Waayaha dunida maanta ee caawiyey bartilmaameedsiga Soomaaliya

1. Khayraadkii dabiiciga ahaa oo gabaabsi noqday, tartan ba'anna lagu qamaamayo dhulalka weli dihin ee Soomaaliya ka mid tahay. Saliidda ama batroolka oo keliya ayaa waxaa la tilmaamay inuu dhulka Soomaaliya dhex fadhiyo kayd ka badan afar bilyan oo fuusto (Africa Banking Network, February 2011) ;
2. Casrigaan caalamiyeynta (globalization) oo xuduud-qarameedyadii la micna-tiray, meelna la isaga tuuray mabda'ii xaq-dhawrka madax-bannaanida qaran ee uu dal leeyahay(national sovereignty);
3. Dunidii oo noqotay hal tuulo oo hal taliye leh (Maraykan) iyo Soomaalida oo xilliyo ay sidaan ka duwaneyd taliyahaas ku madax adkaatay kana caraysiisay (faahfaahinta hoos ka eeg);
4. Ifafaalaha loo bixiyey 'failed states (dowladaha burburay) kaas oo laba waji leh: a) in la fashiliyo madax-bannaanidii iyo qaran-dhiskii Afrika; iyo b) in la burburiyo qaranimada dowlado dhulkoodu khayraad badan ku fadhiyo oo ka tirsan dunida Islaamka. Soomaaliya oo labadaas qolaba ka tirsan waxay u egtahay in laga dhigtay garoon lagu tijaabiyo istraatiijiyaddaas caalamiga ah (Africareview.com, 1 July 2010) ;

B) Sababaha sida gaarka ah Soomaalida loogu Bartilmaameedsaday

1) **Gacan-ku-dhigidda Khayraadka dabiiciga** ah ee la hubsaday inay dalkan ceegaagaan (sidii aan hore u sheegnay) Soomaalidana loo arkay kariwaa aan la isku hallayn karin;
2) Goobta **istratiijiga** ah;
3) **Ilaalinta ammaanka Itoobiya iyo Keenya,** kuwaas oo ay Maraykan iyo Yurubta galbeed Soomaaliya ka jecelyihiin, dano waaweynna ka leeyihiin;
4) **Madax-adayg, isla-weyni** iyo **ajnabi-quursi** Soomaali lagu bartay laguna nacay;

Copyright © 2011 WardheerNews.com

5) **Qaran-dhis la sharaystay**. 1970[nadii] Soomaaliya waxay safka hore ka gashay dowladaha Afrika ugu xoogga iyo horumarka badan. Waxay ku tallabsatay qaran-dhis aan cidna looga haybaysan oo wata xammaasad waddaniyadeed iyo ciidan-dhis gaarey inay qabsato Itoobiya oo ahayd cududda militari ee caado ahaan ugu xoog badnayd Afrikada madow.Waxaa la dareemay inay halkaas ka soo guuxayso dowlad-qarameed (nation-state) xoog leh, Afrikaan ah, Muslin ah, reer-galbeed-diid ah, halis galin karta Itoobiya iyo Keenya iyo weliba danaha reer-galbeedka ee Geeska Afrika. Waxaa loo arkay dalka keliya ee Afrikada madow uu si sahlan uga taabba-gali karto dowlad-qarameed **tiirar adag** ku taagan, maxaa yeelay waa dalka keliya ee ay deggentahay uummad mid ah, ku midaysan dhul, dhaqan, dhalasho, af, diin, diir iyo taariikh lagu dhaato intaba, lehna idolojiyad waddaniyadeed (Soomaalinimo). Dowlad noocaas ah oo Afrika ka hana-qaadda waxay u ekaatay arrin ayan aqbali karin quwadaha lidka ku ah xornimada Afrika.

6) **Aar-goosi**. Caaddifadda indhaha la' iyo xisaabtanla'aantii aan kor ku soo tilmaamay ayay Soomaalidu, xilligii ay xoogga lahayd (1970[nadii]) waxay safka hore ka gashay oo af-hayeen u noqotay dagaalkii lagula jirey quwadaha maanta dunida ka taliya: reer Galbeed iyo Yuhuud. Waxay kala safatay cadowgoodii ugu weynaa ee ahaa xulufadii uu hoggaamin jirey Ruushku ama Midowgii Sufyeti (USSR). Yuhuudna Carab bay Soomaalidu kala safatay. Nasiibdarro, labaduba (Carab iyo Ruush) Soomaalida si xun bay uga abaal-dhaceen. Ruushku wuxuu cadowga Soomaaliya ku biiray markii uu Maxamed Siyaad Barre (si waalli iyo ka-fiirsi-la'aantii Soomaalida ah) dalka uga eryey, 1978kii. Colaadinta iyo ka-aargoosi-doonka Soomaalida ku wajahan wuxuu cirka isku shareeray markii 1993[kii] miliishiyadii General Caydiid ay dileen sibahdilaad ahna dhulka ugu jiideen askartii Maraykanka. Maraykanna ma aha qolo illowsho dhow sida Soomaalida. Adigoo jiir yar ah marka aad sanka qori ka galiso maroodi kibray oo cid waliba daba joogto, cabsi laga qabo awgeed, maxaad ka filaysaa?

9. Intaas waxaa soo raaca g**o'doon iyo saaxiibla'aan.** Nasiibdarrooyinka Soomaali sii majaxaabiyey waxaa ka mid ah go'doon. Go'doon dhalasho, mid luqadeed, mid joqraafi iyo mid siyaasadeed intaba. Waxaa nugu dhacay "tol-la'aan iyo taag-la'aan"! Soomaaliya waxaa lagu tilmaami karaa dal aan lahayn saaxiib iyo walaal u hiilliya midna, marka laga reebo Jabuuti oo itaalkeedu iska yaryahay, iyada qudheedana ulo booc ah loogu soo tukubayo marka Soomaaliya laga fara-xasho. Walaal kale

Copyright © 2011 WardheerNews.com

waxaa noogu dhawaa Afrikaan iyo Carab. Afrikaanka kuwii noo xigay isticmaar ayaa na dhex dhigay colaad xudduud iyo utun aan dhammaanayn. Carabina waxay ku sifowdey tilmaantii uu hal qarni ka hor ka bixiyey Sayid Maxamed Cabdulle Xasan. Halkii ay noogu hiillin lahaayeen sidii aan marar badan ugu hiillinay ee dartood u eedownay, waxay noogu abaal-gudeen inay silic iyo gaajo iyo tarxiil ku laayaan, xuduudahana ka xirtaan Soomaalidii nafta kula carartay, iyo inay hadiyad noogu soo diraan hub aan isku layno iyo argagixiso dadkayaga ka dhigta wax ay laayaan, wax ay addimmada jaraan iyo wixii soo hara oo ay dabar-gooyaan taariikhdoodii, afkoodii iyo haybtoodii ummadnimo. Ashabaab dhinacyo Carbeed ayaa ugu weyn inta nugu soo dirtay ee taakulaynta la daba taagan. Cadowga kalena si dadban ayuu u kobcinayaa, iyaga iyo burcad-badeeddaba, si looga dhigto sabab dalkan lagu qabsado. Miyuu jiraa dal qura oo Carbeed oo Soomaali u muujiyey in yar oo ka mid ah u damqashadii ay dhawaan muujisay Turkiya oo Yurub ka soo gurmatay, run ahaanna Soomaalida gashatay abaal taariikhi ah oo ay tahay in wax badan laga qoro, lagana mahad-celiyo! Haddii ay dalalka loo yaqaan East Africa Af Swaaxili (iyo weliba af Ingiriisi) isku ehelsadaan, South Africa u gurmato Zimbaabwe iyo Botswana, Ruushku Serbia u hiilliyo, Ingiriisku Maraykan gar iyo gardarraba ku garab istaago, Soomaalida gees go'doon ah ayaa waxaa ku helay 'tol-la'aan iyo taag-la'aan'!

Ma dhab baa "xalku gacanta Soomaaliduu ku jiraa"?

Waxaa jira eray had iyo jeer lagu celceliyo muddadii dalkani burbursanaa. Waxaa lagu doodaa "arrintu Soomaali bay u taal" ". "Xalka Soomaaliya wuxuu ku jiraa gacanta Soomaalida".

Ma dhab baa taasi? Haa iyo maya. Haa, waa dhab haddii loola jeedo, haddaad adigu gacmaha laabato ma jirto cid kaloo wax kuu qabanaysa. Haddaad adigu danahaaga ilaashan weydo cid kastaa danteeda uun bay kaa fushanaysaa. Waa dhab haddii loola jeedo, dhibaatadani ma dhammaanayso ilaa ay Soomaalidu xaqiiqda fahamto kuna camal-fasho, ilaa ay ka waantowdo cudurradii dilay oo ay hooyo u tahay qabyaaladdu, ilaa ay meel uga soo wada jeesato sidii ay isku badbaadin lahayd, ilaa ay dunida kula hadasho cod midaysan iyo hadal cad.

Maya, dhab ma aha haddii loola jeedo "waan ku gawracayaa middida dhiigga lehna jeebkaagaan galinayaa ee isu dhiib boliiska!". Haddii loola jeedo waxaan ku

Copyright © 2011 WardheerNews.com

maqashiinayaa “heshiiya”, markaad heshiisaana waan isku kiin dirayaa oo idin kala didinayaa, waxaan idin oranayaa “dowlad dhista” markaad dhisataanna hoostaan ka curyaaminayaa. “dagaalka joojiya” dabkiisana anigaa hoosta ka shidaya, “madax doorta”, dhab ahaanna ma oggoli mid aanan anigu soo xulan oo danahayga u adeegayn, amarkayga oo keliyana ku shaqaynayn. Haddii loola jeedo dowladdii aan jeclahay markaan arko inay god ku sii dhacayso anigaa ka soo qabanaya (Itoobiya, 1991), Kenya (2008), adigana waa kugu sii tuurayaa haadaanta aad ku dhacayso, ka dibna waan kugu qoslayaa!

Eray kooban, “beesha caalamka” ama quwadaha dibaddu marka ay leeyihiin “arrintu Soomaali bay u taal” way ogyihiin dunida maanta in ayan jirin cid u madax bannaan arrimaheeda, Soomaalina hadalkeedba daa. Waa inaan fahamnaa ujeeddadoodu inay tahay inay ku qariyaan hagrashadooda iy weliba hagardaamadooda, inay uga marmarsoodaan masuuliyadda ka saaran badbaadinta dalkaan iyo dadkaan, sidii loo badbaadiyey dhammaan dalalkii kale ee ku burburay dagaallada sokeeye, laga soo bilaabo Kambodiya iyo Bosniya ilaa Liberiya, Ivory cost, Seralyoon (Sierra Leone) iwm, kuwaas oo aan midkoodna la oran “arrintoodu iyagay u taal” balse lagu badbaadiyey olole caalami ah iyo gurmad laga daacad yahay, halka Soomaaliya oo keliya *20 sano lagu wadey* “**qawda maqashii waxna ha u qaban**.”

Rajadii timaaddaba gacan shisheeyaa dilaysey

Haddii laga dhabayn lahaa “Soomaalida ayay u taal” oo Soomaalida loo deyn lahaa xal u helidda mushkiladdeeda siyaasadeed, mar hore ayay xallisan lahayd oo dowlad rasmi ah dhisan lahayd. Taa waxaa daliil u ah Somaliland iyo Puntland. Sababta ay labaas degaan ugu guuleysteen inay dhistaan heshiis waara iyo maamul dowladnimo waa fursaddii ay u heleen inay iyagu iskood arrimohooda uga tashadaan, intii ay faragalinta shisheeye uga sii jeeddey Muqdishu. Heerka qaranna sidaas ayaa loogu guulaysan lahaa haddii ay si dhab ah uga dhex bixi lahayd gacanta shisheeye ee dahsoon ee xariggii la xiraba hoosta ka furfuraysa, iyadoo adeegsanaysa suntan qabiilka iyo liidnimada iyo iimaanla’aanta siyaasiyiin Soomaali ah.

Haddaad u fiirsato, mar kasta oo rajo timaaddo waa la dhicisaynayey. Markay fursad dahabi ah soo baxdaba waa la iska indha tirayey. Danjire Mohamed Sahnoun ayaa mar hore ka digay. Buuggiisa uu ku magacaabay ‘*Somalia: The Missed Opportunities’* (Fursadaha laga Lumiyey Soomaaliya) wuxuu tilmaamayaa intii fursadood ee Soomaaliya lagu badbaadin karayey haddana ay iska indha tireen quwadaha

Copyright © 2011 WardheerNews.com

hoggaamiya beesha caalamka. Wuxuu ka taariikheeyey ilaa afar fursadood oo Soomaaliya laga lumiyey ka hor waqtiga uu buugga qorayey (1994). Tusaalaha ugu cadcad ee uu soo qaatay waxaa ka mid ahaa hawlgalladii UNITAF iyo UNISOM, kuwaas oo ciidammadii faraha badnaa ee dalka qabsaday ay si fudud muddo gaabann gudeheed dalka dib ugu soo celin kari lahaayeen nabad iyo dowladnimo. Muddadii buuggiisa ka dambeyseyna waxaa la sii lumiyey fursado ka sii badan kana sii cad-cad. Waxaa ka mid ahaa dhisiddii dowladaha ku-meel-gaarka ah, kuwaas oo halkii la taakulayn lahaa hoosta laga wada curyaamiyey, cadowna lagu kiciyey, siiba TNG-dii Carta lagu dhisay oo Soomaalidu ku wada heshiisey, dagaalkii sokeeyena muddo ku joogsadey. Waxaa kaloo ka mid ahaa heshiiskii Khartuum uga bilowday Maxaakimtii Islaamiga iyo DKMG, Juun 2006. Haddii heshiiskaas la dhammaystiri lahaa, ee labadaas dhinac wada dhisi lahaayeen dowlad ay ku midaysan yihiin, beri hore ayuu dalku dagi lahaa oo dowlad awood leh yeelan lahaa, maxaa yeelay ma jirin cid labadaas dhinac ka baxsanayd oo hor-taagnayd ama mucaarad ku noqon kari lahayd. Nasiibdarro si degdeg ah ayaa loo dhiciseeyey, ka dibna loo soo abaabulay ciidammo shisheeye oo dibadda ka soo duula (Itoobiya). Taana waa la iska fahmi karaa micneheedu inuu yahay inay degdeg u hawl-galeen gacmo dibadeed oo dahsoon oo ku talagalay inay rajadaas kala tuuraan ee Soomaalidii heshiisey dib u kala fogeeyaan. Dabcan wax qarsoon ma aha labada dhinac ee heshiinaysey inaan midkoodna madax bannaanayn. Midkood waliba wuxuu ku xirnaa dhinacyo ajnabi ah oo aanu diidi kareyn wixii ay ku amraan!

Bal u fiirso, halka dalalka kale markii ay burbur midka Soomaaliya ka qota dheer qarka u gaaraanba laga soo qabanayey (Itoobiya 1991; Sierra Leone, 2002; Kenya 2008, kwd) ama marka ay dagaal sokeeye ku burburaan gurmad hagarla'aaneed oo aan loo kala harin dib loogu dhisayey (Kambodiya, Bosniya, Liberia, Ivory Cost, Sierra Leone, kwd) Soomaaliya gurmad lagu badbaadiyo iska daaye rajadii iskeed ugu dhalataba sidaas aan aragnay ayaa looga kala tuurayey. Intaas oo keliya miyaaney ku fillayn qofkii in yar oo caqli ah isticmaalaya inuu fahmo jiritaanka shirqoolka aan ka soo sheekaynay, ama haddii eray kale lagu sheego, miyaan taa laga fahmi karin waxa dalkaan ku dhacay, welina ku dhacayaa, inay yihiin wax loogu tala-galay?! Sababta sidaa loogu tala-galay iyo cidda ku tala-gashay, waa wax laga doodi karo, khasabna ma aha inay noqdaan ama wada noqdaan sidii aan soo tilmaamay. Hayeeshee midda aan la dafiri karin (qofkii aan is indha-tirayn) waa in uu jiro ku-talagalkan isaga ah. Mustaqbalka way dhici kartaa inay wax iska beddelaan ku-talagalkan, siiba hadday wax iska beddelaan xaaladda dunida ee maanta jirta (current international order); ilaa imminkase waxa

Copyright © 2011 WardheerNews.com

muuqdaa waxaa weeyaan in lagu talagalay in ayan Soomaaliya ka soo bixin godka ay ku dhacday inay ku sii fogaato mooyaane, inay ku sii fogaato ilaa ay gaadho heer si rasmi ah loo soo af-jaro jiritaanka qaran Soomaaliyeed oo dowlad ah, sidii uu tilmaamay Dr. Michael Weinstein, warbaahinta reer galbeedkuna sannado badan u soo gogol-xaadhaysey. Tusaale ahaan eeg majalladda caanka ah, The Economist tirsigeedii 15/1/20010. Waxay qoreen: 'in Soomaaliya lagu sheego waddan jira waa buunbuunis qalad ah'.

Soo koobid iyo Gunaanad

Haddaan soo ururino, waxaa muuqata Soomaaliya iyo Soomaalida inuu ku soo fool yeeshay **halaag** aan hore loo arag, iyaguna ka indhala 'yihiin. Halaaggaas irridka laga gali doonaa waa qorshe lagu talagalay in la burburiyo oo meesha laga saaro madaxbannaanidii Soomaaliya iyo **qaranimadii Soomaalida**, sida uu nugu baraarujinayo khabiirka Maraykanka ah, Prof. Weinstein. Xog-ururin iyo u-fiirsi badan ka dib, waxaa noo muuqata waxa dalkaan ka dhacay iyo waxa ka sii daran ee ka dhici doonaa inay yihiin wax Soomaali ka weyn kana shisheeya, wallow aan eedda qayb weyn leenahay. Quwadaha maanta dunida ka taliya ee loo yaqaan 'deeq-bixiyeyaasha' (donor powers) **godob aan taariikhda cid kale laga** galin ayay ka galeen Soomaliya **dal** ahaan iyo Soomaalida **dad** ahaanba. Godobtaas dhinacyadeeda waxaa ka mid ah:

1) Waa dalka **keliya** ee muddo **rubuc-qarni** ku dhow lagu daayey burbur, dowladla'aan iyo dagaal sokeeyey, halka dalalkii la midka ah lagu wada badbaadiyey gurmad caalami ah.
2) Laguma daawan oo keliya balse waxaa loogu **joogteeyey** si **ulakac** ah oo qorshaysan.
3) Soomaalidu waa ummada keliya ee dowladaha awoodda leh ay ugu heshiiyeen kala qaybin iyo **kala qaybsi** imminka sii maraya qarnigiisii saddexaad.
4) Taariikhda casriga ah, Somaliya waa dalka keliya ee ay muuqato in la go'aansaday (go'aan weli qarsoodi ah) in laga **tirtiro maabka dunida** ama laga saaro bahda quruumaha xorta ah ee ay ka tirsanayd dal ahaan.
5) Soomaaliya waa dalka keliya ee ay muuqato in shaabbadda Qarammada Midoobey iyo Midowga Afrika lagu ansixin doono inay qabsadaan ka dibna kala googoostaan (si bilowga hore dadban, ka dibna toos ah) dowlado la daris ah (Kenya iyo Itoobiya) oo ay ka dhexeysey colaad soohdineed, halka dalalka kale laga hor istaago gabood-falka noocaas ah. Tusaalihii ugu

Copyright © 2011 WardheerNews.com

dambeeyey wuxuu ahaa markii ay Eritrea qabsatay dhul ay leedahay Djibouti, taas oo si kulul loogu wada cambaareeyey, laguna ciqaabay.

6) Fulinta qodobkan (5) waxaa muuqata in lagu meelmarin doono **afar tallaabo** oo ay midiba mid u **gogol-xaadhayso**:

i. Ciidammada Itoobiya iyo Kenya oo dhulka Soomaaliya intiisa badan qabsada iyadoo sabab laga dhigaayo la-dagaallanka Al-shabaab (taasi way fushey).

ii. In dadka Soomaaliyeed dibadda laga dhigo ka-talinta geeddi-socodka siyaasadeed ee dalkooda, awoodda oo dhanna lagu wareejiyo gacan ajnabi oo adeegsanaysa UNPOS iyo, markii loo baahdo, Midowga Afrika iyo IGAD. Marba wixii ay UNPOS soo diyaarsato uun baa laga saxiixanayaa “madax” Soomaaliyeed oo aan awood lahayn ama dhawr boqol oo qof oo ayan dadka Soomaaliyeed soo wakiilan, balse qolada shirka wadataa soo xulatay (taasi meel fog bay sii socotaa).

iii. Tallaabada ku xigtaa waa in lagu dhawaaqo in dalkii Soomaaliya la oran jirey la hoos geeyey Midowga Afrika (under AU trustship), taas oo noqon doonta **hagoog** in mudo ah lagu daboolo (inta duruufta la bislaynayo) xukunka ciidammada Kenya iyo Itoobiya, kuwaas oo adeegsanaya maamulayaal Soomaaliyeed oo ***iyaga*** ugu shaqeeya daboolka **qoqob-qabileedyo** lagu magacaabo **“dowlad-gobleed”** (way soo dhowdahay).

iv. Tallaabada kama-dambaysta ah, ahna tii loo soo dhutinayey, waa in si rasmi ah loogu dhawaaqo in dalkii la oran jirey “Soomaaliya” uu isu beddelay degaanno (territories) ku kala lifaaqan (annexed) Itoobiya iyo Kenya. Degaanno u kala qoqoban qabiillo midba mid lagu diro. Madax-ku-sheegga degaannadaas waxaa soo magacaabaya, ayna toos uga amar-qaadan donaan Addis Ababa iyo Nairobi, oo iyana wakiil iyo dillaaliin **dhulka** Soomalida iyo **khayraadkiisa** uga ah quwaadaha loo yaqaan “deeq-bixiyeyaasha” ee uu hoggaamiyo Maraykunku. Jaranjarta noocaan ah waxaa mar hore sidaas u sawiray Prof. Michael Weinstein. Wuxuu ku magacaabay “Proxy chain”; sidii uu sawiray ayayna ku socotaa. Waxaa lagu bilaabay gobollada koonfureed iyo kuwa dhexe. Waxaa ku xigi doona gobollada Puntland, ka dibna Somaliland oo la sii kala furfuray. Jibuuti qudheeda waa loo sii habeen-dhaxayaa. Sababta Somaliland loo aqoonsan waayey halkaas ka raadi! Waxaa la diiddanyahay jiritaanka

Copyright © 2011 WardheerNews.com

dowlad Soomaaliyeed oo madax bannaan. Waxaa la ogyahay inay berri (markuu miyirku soo noqdo) u gurman doonto kuwa kale!

7) Tani waxay noqon doontaa taariikhda markii ugu horreysey ee magaca beesha caalamka lagu ansixiyo in waddan xor ah la hoos geeyo urur aan ahayn Qarammada Midoobey (AU) ururkaas oo ka kooban dowlado iyaguba toodii la liita. UN trustship waa wax la yaqaan oo la soo arkay, tanise waa wax aan la arag oo Soomaalida lagu keli yeelay. Xitaa waa loo **quuri waayey** in la yiraahdo ha la hoos geeyo Qarammada Midoobey, muddo cayiman, sidii hore u dhacday.
8) Sababta looga dhigayo AU Trustship, beddelka UN trustship way iska caddahay. Halka waddankan loo sii wado ayaan ahayn inuu aakhirka dowladnimo ku soo noqdo. Taa bedelkeeda waa in aakhirka loo kala qaybiyo dalalka dariska la ah.
9) Taariikhda casriga ah Soomaaliya waxay noqon doontaa dalka keliya ee asagoo xubin ka ah Qarammada Midoobey magaca isla Qaramada Midoobey lagu ansixiyo inay sidii neef la gawracay kala googoostaan waddammo la daris ah oo in badan u ciil qabey.

Kenya iyo Itoobiya uun yay Idiin Muuqan!

Soomaalida waxaa u caado noqotay diidmada faragalinta shisheeyaha in lagu far-fiiqo oo keliya Dowladda Itoobiya. Bilahaan u dambeeyeyna waxaa ku soo korortay Kenya. Doodaha maalmahaan socoda waxaa dadka qaarna eedeeyaan qaarna difaacaanba labadan dal ee aan dariska nahay. Sheekaduna waxay ku kooban tahay soo galidda ciidammadooda. Sartu meeshay ka qurmayso weli lama fahmin. Midda aan weli la fahmin waa arrintu inay intaan aad uga qota dheertahay. Kow, ciidammo soo galay uun ma aha ee waa qorshe-weyne dalkan lagu qaybsanayo. Laba, cidda qorshahaan ka dambaysa, labadan dal ee masaakiinta ah waa adeegayaal uun. Cid baa soo dirtay, maal-galinaysa, adeejinaysa. Ciddaasi waa quwadaha waaweyn ee aan soo tilmaannay. Way jirtaa inay la bukaan cudurkii colaadda xuduudaha iyo cabsi-ka-qabidda dowlad Soomaaliyeed. Haseyeeshee qorshahan socdaa waa mid tankooda ka weyn. Labaduba hadday is-gaashaan-buursadaan way ogsoonyihiin in ayan Soomaali ka adkayn kuna guulaysan karin inay si dhab ah u qabsadaan. Mustaqbalka fogna dadyowgooda dhib mooyee dheefi uguma jirto colaad sii fidda. Sidaa awgeed, waa la qaldamayaa haddii iyaga uun lala yooyootamo ama lala

Copyright © 2011 WardheerNews.com

beegsado eedaynta iyo is-difaaca afka ah. Iyagu waa daris iyaguba taag daran oo dani is kaaya badday, isticmaarna isku kaaya diray. Haddii la isu kaaya daayo si uun baan u heshiin lahayn. Ciddii markii horeba mashaakilka na dhex dhigtay weeyaan halka ay weli musiibadu ka socotaa. Halkaas ayaa u baahan in la beegsado oo lagu yiraahdo “maxaa nugu kiin salliday?”!

“*Balaayo dabo la qabto ma leh ee daaman la qabtay leedahay*!”.

Sida uu qeexay Prof. Weinstein, qorshahan mar hadduu qalinku ku dhaco ee calanka Soomaaliya la laabo, ma jiri doonrto **furtsad** iyo **awood** dambe oo ay dadka Soomaaliyeed u heli doonaan inay dib u soo ceshadaan gobanimadoodii ama ka taliyaan aayohooda. Waxay **si joogta ah** ugu garba-duubnaan doonaan quwado ka awood badan oo ah kuwii awelba godkaas ku ridey, iyadoo Soomaalidu intaas ka awood badan. “nin ku dilay har kuuma jiido”. Imminka uun bay weli wax ka sii harsan yihiin **fursaddii ugu dambeysey**, hadday Soomaalidu **wax fahmaan**, tallaabooyinka ku haboonna qaadaan.

Musiibada intaas baaxad la eg aaladda loo adeegsaday ee ka dhigtay suurtagal magaceedu waa ***qabyaalad***! Qalladdaas ayaa ah kansarka Soomaali halkaa dhigay, cadowgeedana u noqday middi ay ku gawrici karaan.

“*Soomaliya” mise “Soomaali”? Xaqiiq u baahan in lagu baraarugo*:

Hadday sidaas wax u dhacaan, haddu dhinto jirkii guud ee qaranimada Soomaalida, ma jiri doonto cid Soomaali ah oo keli ahaan badbaadda. Ma jiri doono degaan ama reer/qabiil dhibaatadaas ka nabad-gala. Ma jiri doono xitaa **qof** ka badbaadi doona cawaaqib-xumada laga dhaxli doono magaca dhintay iyo gunnimada ay keeni doonto dal-laawenimadu (statelessness). Xataa carruurta Soomaaliyeed ee ku koraysa dunida naga fog, ee weliba haysata dhalashada dalalka hore u maray, waxay dhaxli doonaan dulli, quursi iyo faquuq. Waraysi ay telefishinka HCTV, Hargeysa, beri dhaweyd siisay Faadumo Cali Madar oo ah gabar Soomaaliyeed oo ku guulaysatey kursi Golaha Degaanka Oslo, Norway (2011) waxay si murogo leh uga sheekaysay dhibaatada shaqa-helidda ka haysata dhallinyarada Soomaaliyeed ee qurbaha, marka ay tacliinta sare dhammaystaan ee shaqo doontaan. Waxay tilmaantay xaqiiqda ah dalalka Scandinavia (oo weliba lagu yaqaan dulqaad iyo soo dhaweyn) in marka shaqada loo tartamo, qofkii loo garto “Soomaali” si kastoo uu u yahay kii shaqada ku habboonaa, haaddana loo diido shaqadii oo laga door bido qof qolo

Copyright © 2011 WardheerNews.com

kale u dhashay, taas oo ay u sabab tahay magaca “Somaali” oo durba laga haysto sawir fool xun! Taas ayaa meel kasta taal, marba marka ka dambaysana sii xumaan doonta. Marka dibadda la joogo ee laguu garto “Soomaali” lama kala yaqaan, lamana kala jecla inaad ka timid Muqdishu, Hargeysa, Boosaaso, Jibuuti, Jigjiga ama Gaarrisa. Xitaa qofkii magaca ka carara oo qolo kale sheegta waxaa lagu soo qabanayaa muuqaalka Soomaalida u gaarka ee ayan jirin cid kaloo la wadaagta.

Haddaba, **ha la iska wada xil-saaro badbaadinta magaca**, sababtaa kore awgeed.

Qorshahani hadduu dhaboobo, arrintani waxay halis u horseedaysaa dhinacyo kala duwan (aan Soomaali ku koobnayn). Kow, waxay god aan laga soo saari karin ku ridaysaa qaranimadii Soomaaliya. Laba, waxay **dulli** dhaxalsiinaysaa dadka lagu magacaabo ‘Soomaali’ (the Somali race) meel ay joogaanba, taasina waxay noqon doontaa dambi-weyne (crime) laga galay aadminimada. Saddex, waxay halis ku tahay danta dhabta ah (genuine interests) ee dadyowga Geeska Afrika, siiba kuwa Itoobiya iyo Keenya. Waxay albaab cusub oo khatar ah ku fururaysaa guud ahaan ummadaha xorta ah iyo kuwa xornimada jecel, siiba kuwa dunida saddexaad. Waxay khalkhal galinaysaa xasilloonida mandiqadda iyo tan dunidaba. Waxay liddi ku tahay danaha xilliga fog (long term) ee dadyowga reer galbeedka. Cidda keliya ee adeegsanaysaa waa hoggaamiyeyaal ka leh dano siyaasadeed xilliga dhow(short term) iyo shirkado aan arxan iyo iimaan lahayn oo ka leh dano dhaqaale.

Siday u indha xuntahay uma Alle la’a!

Sawirkaas kore waa sida ay muuqato in lagu tala-galay. Se tii Alle iyana waa meesheeda. Waa halkii gabayaagu ka lahaa: “*waxaad aadanow maaggantahay adiyo maankaagu, iyo meel Ilaahay ku marin kala mid weeyaane*”.

Iliilaha rajada / badbaadada:

1. Soomaalidu uma samaysna dad u hoggansama dulli iyo addoonsi. Waa dad dhiig kulul, ficilo badan, geesi ah; waase marka ay wax fahmaan oo baraarugaan.
2. Quwadaha shisheeye caado ahaan way ku qaldamaan Soomaalida. Waxaa kaga soo baxa wax ayan fileyn.
3. Itoobiya iyo Kenya ma laha awood (capacity) ay waqti dheer ku muquuniyaan Soomaali oo dhan.

Copyright © 2011 WardheerNews.com

4. Waayaha dunidu way is beddeli karaan. Ma jiraan wax waligood sidooda ahaanaya. Dabaylo khayr qaba ayaa ka soo dhici kara meel aan laga fileyn. Laba sano ka hor yaa saadaalin karey inay Bariga Dhexe ka dhici doonaan wixii ka dhacayey bilihii la soo dhaafay! Geerida wiil is gubey ayaa waxaa ka kacay dhul-gariirka siyaasadeed ee gabi ahaanba beddelay wajigii dunida Carabta.

Yaan la biqine ha la baraarugo! Siiba dhallinyaroy baraaruga oo badbaadiya mustaqbalkiina halistu ku socoto. Cidna ha isku hallaynina. Arka oo ku dayda dhallinyarada Bariga Dhexe iyo weliba Yurub ee aan ku soo xusnay bilowga qoraalkan. Akhrista taariikhda awooweyaashiin, halyeeyadii SYL iyo SNL ee naftooda u huray gobanimada maanta la burburinayo! Waxay ahaayeen dhallinyaro Soomaaliyeed oo da'doodu yartahay.

Maxaa talo ah?

Waxaan ku soo gabagabaynayaa talooyin laba qaybood ah. qayb khusaysa istraatiijiyad iyo aayaha dambe iyo mid ku wajahan la-falgalka xaaladda siyaasadeed ee xilligan taagan:

A) Is-badbaadinta Guud iyo Aayaha Dambe

Dadka Soomaaliyeed waxaan leeyahay:

1. Ka toosa suuxdinta iyo hurdada dheer! Arka xaqiiqda idin hor-taal! Eega godka dheer ee aad ku sii hoobanaysaan maalinba maalinta ka dambaysa, cid idnka qabanaysaana jirin, mid idinku sii tuurta mooyaane. Fahma in lagu tala-galay in aan dib dambe loo arag Soomaali dowlad ah oo aayeheeda ka talisa. **Ku tashada** ama **ka tashada** xaqiiqdaas!
2. Iska daweeya cudurrada bulsho / cilladaha kor ku taxan. Ka bilaaba *kansarka* qabiilka. Waa aafada aafooyinka. Inta aad qabiil ku indhala'dihiin qaranimo ha sugina! Qaran-la'aanna nolol sharaf leh ha sugina!
3. Dareema kana dagaallama saddexda tummaatiyood ee **lagama-kacaanka** ah ee cadowgu xoogga saaray:

a) Dilka qaranimada iyo tirtiridda waddaniyad Soomaalinimo iyo hayb ummadnimo;
b) Dulleynta iyo fool-xumaynta magaca "Soomaali" ilaa ay cid waliba ka cararto.
c) Sumaynta deegaanka iyo ololaha xaalufinta dhulkii Soomaalida oo bad iyo beiriba la kala boobayo khayraadkii ku jirey.

Copyright © 2011 WardheerNews.com

Wax kaleba laga yaabe in laga soo kabto mustaqbalka, laakiinse saddexdaas tummaatiyood oo imminka meel fog sii maraya hadday sidaa ku sii socdaan Soomaali dambe Allaha u naxariisto.

4. Quruumaha dunida (sida Turkiga, Shiinaha, Malysiya, iwm) soo jiita, saaxiibtinimo ka kasba, hiil weydiista, dhanka kalena kuwa wax laga tirsanayo si cad ha loola xaajoodo, runta ha loo sheego, damiirkooda ha la dhaqaajiyo, ha la yiraahdo: “tolow maaweelada iyo hagardaamada naga daaya, wixii aan bi’inay waan ka toobad keenaynaa, xaal qaata, wax allaale wixii aad doonaysaan diyaar baan idiinla nahay, bog cusub aan wada furno, keliya noo oggolaada inaan noolaano!” Isla markaas waa inaan ka dhabaynaa inaan is beddelno ee joojino wixii nalaku nacay, sida yasidda ummadaha kale. Waxa loo baahan yahay waa hab-dhaqan miisaaman oo ka fog dullinimo iyo macangagnimo labadaba.

B) La-falgalka Xlliga taagan (immediate measures**)**

1. Tashada DAD baa Alle idinka dhigaye. Ha sugina dowlad ay dar Ilaahay idiinku dhisaan UNPOS iyo wax la yiraahdo “beesha caalamka”. Indhaha fura oo fahma riwaayadda la idinku hoosaasinayey in ka badan 20 sano welina la soo celcelinayo. Intaa ka badan ha ku sirmina “shir baa la idiin qabanayaa”.

2. *Idinku* iska dhex saara argagixisada iyo burcad-badeedda halaq-mareenka noqday, magacii ummaddaanna dilay.

3. Ku mintida calanka sii dhacaya sidii uu ku sii taagnaan lahaa – ku fara adayga inaan meesha laga saarin astaanta qaranimo, micnaha haya’adaha qaran (baarlammaan, madaxweyne iwm) ee weli la aqoonsan yahay, haba iska liitaane, ciddii doontaana madax ha ka ahaatee. Inta ay weli jiraanna ha lagu khasbo inay fagaarayaasha dunida (laga bilaabo shirka London, Feb. 2012) kaga hadlaan af cusub iyo cod ummadeed oo ka tilmaan-qaadanaya xaqaa’iqa kor ku tilmaaman.

4. Haddii astaantaas la badbaadin kari waayo, ha laga dagaallamo hoos-geynta Midowga Afrika, ha loo dagaallamo in muddo cayima masuuliyadda dalka si kumeel-gaar ah loogu wareejiyo Qarammada Midoobey (UN trustship); isla markaana aqoonsi gaar ahaaneed ha loo wada raadiyo Somaliland!

Copyright © 2011 WardheerNews.com

5. Ha laga hortago kala qoqobidda qabiilka ku dhisan iyo dagaalkii sokeeye oo waji cusub u xuub-siibta – “dowlad-goboleedyo midba mid lagu jeediyo, mid kastana dhexdeeda la isku jeediyo.

6. Fursad siiya waxgaradka ummadda ee daacadda ah.

7. Idinkoo kuwaas kaashanaya, *Idinku* la imaada hindise Soomaaliyeed, lagu qabto shir Soomaaliyeed, ka dhaca dhul Soomaaliyeed. Hal-kudheggiisu ha noqdo *‘is-badbaadin’*. Ha loo dajiyo qorshe cilmiyasan. Beesha caalamka ha laga codsado oo keliya inay aqbalaan qabashadiisa iyo natiijadiisa. Ha ka codsanina inay maal-galiyaan! Ka codsada inaan middiyo qarsoon lagu fashilin. Ka codsada in bal mar uun Soomaalida la siiyo fursad ay *iyagu* uga tashadaan aayohooda, wixii ay ku tashadaanna la xaq dhawro.

8. Dunidu maanta waa hal tuulo oo isku wada xirane, tix galiya danaha aan turxaanta lahayn ee saamileyda shisheeye. Qorshaha iyo natiijooyinka shirka kore ha noqdaan kuwo laga dhex arko inuu u adeegayo danta Soomaalida, danaha dowladaha dariska ah iyo danaha beesha caalmka, guud ahaan iyo gaar-gaar ahaanba. Ku talagal ciddii aadan danteeda tusin inay taada curyaaminayso. *Waxa* loo baahan yahay waa *isku-tashi* aan turxaan lahayn: ka hufan cid-colaadin, shisheeye-fogeyn iyo is-faquuq. Waa iskaashi daacad ah iyo dan-wadaag aan cidna lagu dulmin.
9. Haddaad intaa diiddaan ama awoodi weydaan, ku tala gala masiirkii (cawaaqibkii) uu rubuc-qarni ka hor sii oddorosay Dr. Cumar Cusmaan Raabe, dhawaanna uu nooga digay Dr. Michael Weinstein: geeri qaranimo iyo gunnimo abid ah oo uu ku dambeeyo magicii ‘Soomaali’ ee haybadda weyn lahaan jirey!

M. D. Afrax

Email: Inadaahir2004@hotmail.com

Tix-raac

Diraasaddani waxay u qorantahay hab-saxaafadeed (journalistic style), sidaa awgeed xogta iyo markhaatiyada qoraalku cuskanayo ilaha laga soo xigtay waxay ku wada cadyihiin qoraalka dhexdiisa (in-text).

Copyright © 2011 WardheerNews.com

Copyright © 2011 WardheerNews.com